

## شوال من الست صيام فضل

**Ma Waajib Baa Mise Waa Sunne In La Soomo Lixda Shawaal?** Soonka 6 Shawaal ma aha waajib lakiin Waa Sunne Aad loo Jecel yahay oo ajir aad u weyn ku sugan iyo fadli aan la soo koobi karin, sida nabiga صلى الله عليه وسلم yiri:- **شوال من بست أتبعه ثم رمضان صام من** (Qofkii Sooma Ramdaan Kadibna Raaciya Lix Shawaalka kamid Ah Wuxuu La Mid Yahay Qof Soomay Sanadka OO Dhan) Qofka muslimka waxaa lagama maarmaan u ah inuu ka faaideysto fadliga weyn ee lixda maalmood bisha shawaal aad soontay ku heleysid ajir lamid ah adigoo soomay sanadka oo dhan, waa fadli aad u weyn alle ku manaystay adoomadiisa wanwanaagsan.

**Qofka Muslimka Ah Ee lagu Lee Yahay Soon katagay ma waxa uu soomayaa 6 Shawaal Mise marka Hore Wuxuu Gudayaa Soonka Lagu lahaa?** Imaam Ahlu Sunnah Waljaamac Alcalaamah Ibn Baaz wuxuu yiri " Culimada wey isku khilaafeen laakiin sida saxda ah waxay tahay qofka marka hore inuu dhameeyo waajibka lagu lee yahay kadib uu u gudbo sunnadaan fadliga badan iyo ajirka weyn maxaa yeelay wixii lagugu lee yahay in aad guda waa waajib laakiin in aad soontaa 6da maalmood ee Shawaal Waa Sunne, Qofka Muslimka ah waa in marka hore muhiimada siiyaa waajibka. [ **ومقالات فتاوى مجموع** ] **ص 392 15 الجزء -الله رحمه - باز بن عبدالعزيز :الشيخ لسماحة متنوعة** Alcalaamah Imaam maxamed Saalax Ibn Cuthaymiin wuxuu yiri " qofka lagu lee yahay soonki ramadaan ma helaayo fadliga badan & ajirkaan weyn ilaa uu ka dhameeyo Soonkii waajibka ahaa ee lagu lahaa maxaa yeelay Nabiga صلى الله عليه وسلم wuxuu yiri Qofkii Sooma Ramadan kadib raaciya" fadligaan waxaa leh qofkii sooma bisha ramadaan kadib raaciya marka waxaa horeeya in Ramadaan lawada soomay qofkii wax ka tagay wuxuu lee yahay inuu soo gudo kadib 6 shawaal raaciya [ **الدعوة كتاب -الله رحمه - عثيمين ابن فتاوى** ] **1/52-53.**

**Qofka Ma Inuu Soomaa 6 Maalmood Oo Isku Xigxiga Mise Wuxuu lee yahay markuu Doono inuu Bisha Shawaal Ka Dhex Soomo?** Imaam Ahlu Sunnah Waljaamac Alcalaamah Ibn Baaz wuxuu yiri "Nabiga صلى الله عليه وسلم waxa ka sugnaada inuu yiraahday **من صححه** " **الدهر كصيام كان شوال من ستاً أتبعه ثم رمضان صام من** (Qofkii Sooma Ramdaan Kadibna Raaciya Lix Shawaalka kamid Ah Wuxuu La Mid Yahay Qof Soomay Sanadka Oo Dhan) Ma ahan mid lacayimay maalmo gaar ah balse qofka mu'minka wuxuu lee yahay inuu soomo waqtiguu ka doono bisha shawaal dhexdeeda, haduu doono awalkeeda ayuu soomayaa haduu doono dhexdeeda, haduu doono aakhirkeeda, haduu doono wuu kala googooynayaa, haduu doono wuu is wada raacianayaa, alxamdulilaah arinka waa waasic, laakiin haduu awalkeeda 6da shawaal iswada raaciyo kaas ayaa afdal ah maxaa yeelay arinkaas waa udegdegid khayrka laakiin waajib kuma aha qofka [ **باز بن عبدالعزيز :الشيخ لسماحة متنوعة ومقالات فتاوى مجموع** ] **- الله رحمه** **390 ص 15 الجزء -الله رحمه**

